

## Xusuusinta HotSpot ka Verizon

Verizon waxa la ogaysiiyey in tiro aad u yar – oo kayar .001% - oo hotspot yada internet ka ee Verizon oo cayiman ah (aaladaha loo yaqaan “Verizon Ellipsis Jetpack MHS900L iyo MHS900LS”) ee loo adeegsado waxbarashada masaafadda ah ay si laxaad leh u kulayl dhaafeen oo ay gaysteen dhaawac la xidhiidha kulayl.

Verizon iyo warshadeeyaha aaladdu waxa ay baadhayaan sababta dhacdooyinkan waxana aanu kala shaqaynaynaa Verizon bixinta ikhtiyaarro loogu talagalay beddelitaanka aaladdaada haddii aad doorato.

**Fadlan ka wac Verizon 800-540-4263 si aad u diyaariso beddel si toos ah.**

Si gacan looga geysto dardargelinta ka shaqaysiinta ammaanka ah ee dhammaan aaladaha, warshadeeyuhu waxa uu soo jeedinayaa tallaabooyinka ugu wanaagsan ee soo socda:

Adeegso keliya xadkaha dabeeyeyaasha ah ee la ansixiyey, oo uu ku jiro xadhiga la bixiyey.

Kasaar dabka aaladdaada marka ay si buuxda u dabaysanto. Aaladaha waa inaan dabka ay ku jiraan loogu deyn si joogto ah.

Marka aan la adeegsaneyn, dami aaladdaada.

Aaladdaada dul saar oogo siman, adag oo xooggan sida sagxad ama miis.

Hubi in aaladdaadu aanay dahaadhneyn si hawo wanaagsan ay u hesho.

Ku ilaali aaladaha heerkul u dhaw ka caadiga ah ee qolka marka aad adeegsanayso.

Ha u baylihin aaladaha heerkullo aad u sarreeya muddooyin wakhti ah oo dhaadheer.

Ha u baylihin aaladda ama baytarigeeda biyaha ama dareerayaasha kale.

Ha tuurin aaladaha hana gelin walxo aan kamid ahayn baytariga ama aaladda.

Tiknoolajiyaddu waxa ay sii waddaa inay kaalin muhiim ah ka ciyaarto hanaanka waxbarasho. Haddii aad qabto wax su'aalo ama walaacyo ah oo ku saabsan tiknoolajiyadda lagu siiyey, fadlan la xidhiidh dugsigaaga si uu kuu taageero.